| | |
|---|---|
| جمهورية مصر العربية | ٧ رمضان ١٤٤٣هـ |
| وزارة الأوقاف | ٨ أبريل ٢٠٢٢م |

(١)

# Dhinacyada iimaanka iyo dhinacyada akhlaaqda ee soonka

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{وَسَارِعُوا إِلَى مَغْفِرَةٍ مِنْ رَبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا السَّمَاوَاتُ وَالْأَرْضُ أُعِدَّتْ لِلْمُتَّقِينَ * الَّذِينَ يُنْفِقُونَ فِي السَّرَّاءِ وَالضَّرَّاءِ وَالْكَاظِمِينَ الْغَيْظَ وَالْعَافِينَ عَنِ النَّاسِ وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ}،**

**(Una deg daga Dambi dhaafka rabbigiina iyo Janno Ballaarkeedu yahay cirarka iyo Dhulka oo loo darbay kuwa dhawrsada * Ee ah kuwa wax bixiya Waqtiga Ladnaanta iyo Dhibkaba, ee cabburiya carada ee iska Cafiya Dadka, Allana waa Jecel yahay Samafalayaasha)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Alle (cazza wa jalla) wuxuu soonka u jideeyay ujeeddooyin sarsare iyo xigmado waaweyn, waa dugsiga iimaanka laga barto iyo akhlaaqda, qofka fiirfiiriya Quraanka kariimka wuxuu ogaanayaa Allaha xaqqa ah (SW) inuu ku sheegay kitaabkiisa sharafta badan ujeeddada laga leeyahay soonka wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ}،

**(Kuwa xaqa rumeeyow waxaa laydinku waajibiyay Soonka sidii loogu waajibiyay kuwii idinka horreeyay si aad u dhawrsataan).**

Taqwada waa arrin khayr oo dhan horseed u ah; sidaa awgeed waxay kusoo aroortay Quraanka kariimka iyadoo ku xiran qiyam iimaani iyo kuwo akhlaaqi ah ee kala duwan, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

{لَيْسَ الْبِرَّ أَنْ تُوَلُّوا وُجُوهَكُمْ قِبَلَ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالْكِتَابِ وَالنَّبِيِّينَ وَآتَى الْمَالَ عَلَى حُبِّهِ ذَوِي الْقُرْبَى وَالْيَتَامَى وَالْمَسَاكِينَ وَابْنَ السَّبِيلِ وَالسَّائِلِينَ وَفِي الرِّقَابِ وَأَقَامَ الصَّلَاةَ وَآتَى الزَّكَاةَ وَالْمُوفُونَ بِعَهْدِهِمْ إِذَا عَاهَدُوا وَالصَّابِرِينَ فِي الْبَأْسَاءِ وَالضَّرَّاءِ وَحِينَ الْبَأْسِ أُولَئِكَ الَّذِينَ صَدَقُوا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُتَّقُونَ}.

**(Samo falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan qorrax ka soo bax iyo qorrax u dhac, laakin samafale waa ruuxii rummeeya Alle, iyo Qiyaame iyo malaa'igta iyo kitaabka (kutubta Alle), iyo nabiyada, oo siiya xoolaha isagoo jecel qaraabada, iyo agoonta, iyo masaakiinta, iyo musaafirka, iyo kuwa tuugsada qoor xureyn, oogana salaadda, bixiyana zakada, oofiyana ballanqaadkooda, markay ballamaan, oo ku adkeysta dhibka iyo rafaadka iyo waqtiga dagaalka, kuwaasina waa kuwa ka runsheegay Iimaankooda waana kuwa dhawrsada)**

Dhinacyada imaanka iyo dhinacyada akhlaaqda ee soonka waxaa ka mid ah ilaalada, soonka wuxuu ka dhexeeyaa addoonka iyo rabbigiisa, qof aan Alle ahayn ma ogaan karo, waana daliilka tusinaya qofka inuu aaminsan yahay daalacashada Alle (SW)

markuu qarsoon yahay iyo markuu muuqdaba, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَمَا تَكُونُ فِي شَأْنٍ وَمَا تَتْلُو مِنْهُ مِنْ قُرْآنٍ وَلَا تَعْمَلُونَ مِنْ عَمَلٍ إِلَّا كُنَّا عَلَيْكُمْ شُهُودًا إِذْ تُفِيضُونَ فِيهِ وَمَا يَعْزُبُ عَنْ رَبِّكَ مِنْ مِثْقَالِ ذَرَّةٍ فِي الْأَرْضِ وَلَا فِي السَّمَاءِ وَلَا أَصْغَرَ مِنْ ذَلِكَ وَلَا أَكْبَرَ إِلَّا فِي كِتَابٍ مُبِينٍ}.**

**(Wixii Xaala ood ku Sugan tahay wixii quraana ood Akhrin, wixii camala ood falaysaan waan idin la joognaana (ognahay) markaad dhex galaysaan, kagama Qarsoona Eebahaa waxa u yar Dhulka dhexdiisa iyo Samada, wixii ka yar iyo wixii ka wanynna Kitaab cad bay ku sugan yihiin)**

Ilaalada awgeed ayuu ajirka soonka u weynaaday ma oga qadarkiisa qofaan Alle ahayn (SW) wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(كلُّ عملِ ابنِ آدمَ يُضاعفُ، الحسنةُ بعشرِ أمثالِها، إِلَى سَبْعِمائةِ ضِعفٍ، قال اللهُ تعالى: إِلَّا الصَّوْمَ؛ فإنَّه لِي، وَأَنَا أَجْزِي بِهِ، يَدَعُ شَهْوَتَهُ وَطَعَامَهُ مِنْ أَجْلِي)**

**(Camal kaste u sugan aadanaha waa la laballaabayaa xasanada toban la mid ah ayay u dhigantaa ilaa toddobo boqob laballaab, wuxuu yiri Allaha sarreeya: soonka mooyee; anaa iska leh anigaana ka abaalmarinaya, qofka dartayda ayuu uga tagayaa shahwadiisa iyo cuntadiisa)**, qofka sooman waxaa ku habboon inuu Alle (SW) iska ilaaliyo markuu sooman yahay iyo markuu camal samaynayo iyo markuu wax soo saarayo iyo dhamaan dhaqamadiisa waqtiga Ramadaanka iyo waqtiyada kalaba.

Ramadaanka waxaa laga bartaa sabarka qaab kasta uu yahay; soonka waxaa ku sugan in lagu sabro gudashada daacooyinka, iyo in lagu sabro ka fogaanshaha waxyaalaha xaaraanta ah, iyo in lagu sabro shahwada in laga haro, sidaa awgeed nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ku tilmaamay bisha Ramadaan bisha sabarka, wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(صَوْمُ شَهْرِ الصَّبْرِ وَثَلَاثَةِ أَيَّامٍ مِنْ كُلِّ شَهْرٍ صَوْمُ الدَّهْرِ)**

**(soonka bisha sabarka iyo seddex maalbood laga soomo bil kaste waa soonka daharka (waqtiga)),** qofka sooman waxaa ku habboon inuu ku dhaqamo dhaqanka dulqaadashada inuu cabburiyo ciilkiisa iyo inuu iska cafiyo qofkii dulmiyay iyo inuu siiyo qofkii wax u diiday, iyo inuu wanaag u sameeyo qofka xumaan ku sameeyay, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(وَإِذَا كَانَ يَوْمُ صَوْمِ أَحَدِكُمْ فَلا يَرْفُثْ يَوْمَئِذٍ، وَلاَ يَصْخَبْ، فَإِنْ سَابَّهُ أَحَدٌ أَوْ قَاتَلَهُ، فَلْيَقُلْ: إِنِّي امْرُؤٌ صَائِمٌ).**

**(Haddii midkiina uu sooman yahay yuuna afxumo ku dhaqaaqin yuuna qaylinin haddii qof caayo ama la dagaallamo ha yiraahdo: waxaan ahay qof sooman)**

Sidoo kale qofka si dhab u sooman been ma sheego, wax ma qisho, ballanka ma buriyo, wax ma khiyaamo, qof ma xanto, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(من لم يدَعْ قولَ الزُّورِ والعملَ بِهِ، فليسَ للَّهِ حاجةٌ بأن يدَعَ طعامَهُ وشرابَهُ)**

**(Qofkaan iska dhaafin Hadalka beenta iyo ku dhaqankiisa Ilaahay dan kama laha inuu ka tago cuntadiisa iyo cabbitaankiisa)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay nebiyada iyo rasuullada, sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan soonka waa in lays taakuleeyo iyo in laysu naxariisto, iyo qofka inuu dareemo dadka ku hareera ee ah fuqarada iyo dadka baahan; wuu u turayaa qalbigana wuu u qaboojinayaa danahoodana wuu u fulinayaa, waxaa la weyddiiyay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee): islaamkee ugu fiican? wuxuu yiri (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(تُطْعِمُ الطَّعَامَ، وتَقْرَأُ السَّلَامَ على مَن عَرَفْتَ ومَن لَمْ تَعْرِفْ).**

**(Cunto ayaad quudinaysaa waadna salaamaysaa qofkii aad garanayso iyo qofkii aadan garanaynin)**

Hadduu yahay ajirka istaakulaynta iyo isu naxariisashada iyo wax bixinta iyo quudinta cuntada wax aad u weyn waqtiyada oo dhan, bisha Ramadaan ayay arrimahaas ajir badan yihiin kana sawaab fiican yihiin, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَنْ فَطَّرَ صَائِمًا كَانَ لَهُ مِثْلُ أَجْرِهِ، مِنْ غَيْرِ أَنْ يَنْقُصَ مِنْ أَجْرِ الصَّائِمِ شَيْءٌ)،**

**(Qofkii afuriyo qof sooman wuxuu leeyahay ajirkiisa oo kale isagoo aan wax laga dhimin qofka sooman ajirkiisa)**,

wuxuu leeyahay sayidkeena Cabdullaahi bin Cabbaas (Alle raalli haka noqdee):

**(كان رسولُ اللهِ صلَّى اللهُ عليهِ وسلَّم أجودَ الناسِ بالخيرِ، وكان أجودَ ما يكون في شهرِ رمضانَ)**

**(Rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ahaa midka dadka ugu deeqsinima badan xagga samafalka wuxuu ugu deeqsinima badnaa bisha Ramadaan)**

Maxaa ka qurux badan in aan ka barano dugsiga soonka casharrada imaanka iyo akhlaaqda qiimaha badan ilaa aan ka gaarno ujeeddada soonka iyo dhabtiisa wuxuu leeyahay sayidkeena Jaabir bin Cabdullaahi (Alle raalli haka noqdee):

(**Haddii aad soomayso ha ka soomo maqalkaaga iyo araggaaga iyo carrabkaaga beenta iyo dambiyada, iskana daa dhibka dariska korkaaga ha ahaato deganaan iyo xasillooni maalinta aad sooman tahay**).

**Ilaahayow ilaali dalkeena Masar iyo dhamaan dalalka caalamka**